Nidaamka Waxbarashada Gaarka Ah: Waxyaabaha Aad U Baahan Tahay In Aad Ka Ogaato

Marka aad tahay waalid ilmihiisa loo fidiyo waxbarashada gaarka ah, waxaa muhim ah in aad fahamto fikradaha aasaasiga ah si aad ugu doodo sida ugu haboon waxbarashada ilmahaaga. Qodobada aasaasiga ah ee looga hadlayo halkan waxaa ka mid ah:

- Sharciga Dadka Naafada ah iyo Waxbarashada (IDEA)
- Qeexitaanka Nidaamka Waxbarashada Gaarka Ah
- Nidaamka Waxbarashada Gaarka Ah
- Xuquuqda Marista Nidaamka
- Ma Dooneysaa Caawinaad Dheeraad Ah.

Sharciga Dadka Naafada ah iyo Waxbarashada (IDEA)

Waxaa mahad celin mudan sharciga dawladda dhexe ee lagu magacaabo Individuals with Disabilities Education Act, or IDEA, children with disabilities are entitled to a free appropriate public education. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira loo fidiyo caruurta naafada ah ee da'doodu u dhaxeyso 3 ilaa 22 sano waana mid lacag la'aan ah. Sharcigu waxa uu waalidiinta siinayaa fursad iyo xaqa ay u leeyihiin in ay xubin ka noqdaan kooxda go'aanka ka gaareysa waxbarashada ilmaha. Waalid ahaan waxa aad xaq u leedahay in:

- Lagu wargeliyo (si qoraal ah, ku qoran luqadda aad ku hadasho) xuquuqda sharcigu kuu ogol yahay (xuquuqdaada sharciga ah).
- In lagu siiyo nuqulka waxyaabaha aad xaqa u leedahay nidaamka waxbarashada ee dugsiga.

Qeexitaanka Nidaamka Waxbarashada Gaarka Ah

IDEA waxa ay ku qeexdaa 'Waxbarashada Gaarka Ah' hab barasho oo si gaar ah loogu talo galay, oo waalidka aan lacag laga qaadin, taasoo loogu talo galay wax ka qabashada baahida gaarka ah ee ilmaha naafada ah, waxbarashadaas waxaa ka mid ah:

- Fasalada caadiga ah iyo kuwo gaar ah.
- Dugsiyo gaar ah
- Tilmaamaha jimicsiga jirka
- Tilmaamaha guriga
- Isbitaalada iyo Tilmaamaha
- Tilmaamaha waxyaabaha gacanta laga qabto

Nidaamka Waxbarashada Gaarka Ah

Nidaamka waxbarashada gaarka ah waa mid loogu talo galay in lagu xaqiijiyo in arday kasta oo naafo ka ah uu helo waxbarasho isaga u gaar ah oo wax looga qabto baahida ardayga. Waxaa muhim ah in aad fahamtaan in nidaamkan uu ka kooban yahay qeybo kala duwan oo mid Walba goonideeda muhim u tahay. Muuqaalka soo socda ayaa si habon loogu soo bandhigay talaabooyinka la qaadayo nidaamka. U adeegso in ay kuu noqoto hogaamin iyada oo qeyb kasta hoos lagu faahfaahiyey.

Meel kale loo diro/Helitaanka Caruurta:

Haddii ay ilmahaaga ku adag tahay waxbarashada, waxaa laga yaabaa in loo diro qiimeynta waxbarashada gaarka ah. Codsigan qiimeynta waxa uu ka iman karaa waalidka, dugsiga ama Ardeygaaga. Haddii aad u codsaneyso ilmahaaga waa in aad qoraal ku codsataa oo aad faahfaahisaa waxyaabaha kugu dhaliyey. Taasi waxa ay ka caawineysaa in la ogaado haddii naafanimada ilmaha saameyn dadban ku leedahay waxbarashada. Waxyaabaha ka soo bixi kara codsiyada waa:

- In Dugsigu ku dhaqaaqo nidaamka qiimeynta.
- In dugsigu go'aan ku gaaro in aan qiimeynta loo baahneyn.

Haddii ay ogolaadaan in qiimeynta sameeyaan iyo haddii kalaba, dugsiga waxaa waajib ku ah in waalidka go’aankooda qoraal ku gaarsiiyaan (kaasoo lagu magacaabo ogeysiiska u horeeya) iyada oo la faahfaahinayo sababta ay go’aankaas u qaateen.

Qiimeynta:

Qiimeynta waa nidaam lagu soo ururiyo macluumaadka ku saabsan ilmahaaga ee loo adeegsanayo in go’aan lagaga gaaro haddii uu ka soo baxo shuruudaha waxbarashada gaarka ah. ardayga waxa uu marayaa tijaabooyin kala duwan oo lagu eegayo dhinacyada kala duwan ee barashada sida luqadda, waxbarshada, bulshada, dareenka, garashada iyo waxyaabaha lagu

ogaaday baaritaanka caafimaadka. Waxyaabaha muhimka ee la doonayo in aad xusuusnaataan waa:

- Dugsiyadu waxa ay heystaan 45 cisho oo ay ku dhameystiraan tijaabooyinka kala duwan ka dibna marka uu soo gaaro ogolaashaha qoraalka ah ee waalidiinta.
- Tixgeli in aad dugsiga la wadaagto qiimeynta gaarka ah, aqoonsi naafanimo, ama dhibaato aad guriga ku aragteen haddii ay jiraan.
- ardayga waa in tijaabada lagu sameeyaa afkooda hooyo oo laga tijaabiyaa meelahaas dareenku ka jiro.

Shuruudaha Ku Xiran (Kala shaandheynta):

Ardayda loo tixgeliyo in ay ka soo baxaan shuruudaha waxbarashada gaarka ah, waxaa waajib ah in ay ka soo baxaan dhamaan 3da qodob ee soo socda ee aad ku aragtaan jaantuska. Kooxda (oo waalidku ka mid yahay) ayaa eega xogta laga soo gudbiyey qiimeynta si ay u ogaadaan in ardayga naafanimo ka muuqato oo uu leeyahay 1 ka mid ah 13 darajo ee loo fidiyo adeegga waxbarashada gaarka ah. Shuruudaha laga doonayo qodob kasta. Waxaa lagu sheegay sharciyada dawladda dhexe iyo kuwa gobolka.

Qorshaha Waxbarashada ee Ardayda U Gaarka Ah (IEP)

Waalidka ayaa go'aan ka gaara waxbarashada ilmahaaga oo qeyb ka noqda guriga shaqaalaha dugsiga iyo kuwa takhasuska gaarka ah leh. Iyaga oo wadajira, waxa ay go'aan ka gaaraan barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga kaasoo loo yaqaan Qorshaha Waxbarashada ee Ardayda. U Gaarka Ah, ama IEP. IEP waa nidaam iyo qoraal labada kaasoo u baahan in la qoro, sida lagu qeexay sida dugsigu doonayo inuu u caawiyo ilmahaaga oo laga caawiyo xirfadaha uu u baahan yahay sanadka oo dhan.

Halka uu ka bilaabayo

Marka ay kooxdu go'aan ka gaaraan nooca adeegga iyo taageerada muhimka ah ee ardayga, talaabada xigta waa in go'aan laga gaaro xagee adeeggaas loogu qabanayaa. Taas waxaa lagu magacaabaa halka uu ka bilaabayo. Ardayga waa in adeegga loogu qabtaa Goobta Xayiraadda Ugu Yar (LRE), kuna haboon ilmaha.

Dib U Eegista Sanadlaha Ah

Ugu yaraan hal mar sanadkii, waa in kooxdu dib u kulmaan oo ay qiimeyn ku sameeyaan guud ahaan barnaamijka ilmaha iyada oo la dhameystiro ujeedooyinka IEP. Haddii ay cadaato in aanu ilmuhu xiliagan wixii ka dambeeya ka soo bixin shuruudaha waxbarashada gaarka ah, waxa uu ilmuhu sii wadayaa nidaamka IEP oo joojinayaa barnaamijka.

Xuquuqda Marista Nidaamka

You have a right to disagree with the team at any point in the process. Haddii ay taasi dhacdo, waxa aad xaq u leedahay in lagu mariyo nidaamka xuquuqdaada (sharciga ah), oo ay ka mid tahay kuwa sharcigu kuu ogol yahay. Xuquuqdaas waxaa lagu faahfaahiyey oo aad ka heleysaa xuquuqda waalidka oo dugsigu ku siiyo. Tani waa mid aad u kooban oo ku saabsan nidaamka waxbarashada gaarka ah.

Ma Dooneysaa Caawinaad Dheeraad

Tan iyo 1983kii, shaqaalaha Xarunta Waalidiinta ee Utah ayaa gacan ka geystay in ay bedelaan nolosha ilmo naafo ah. Waalidka, waxa aanu fahamsanahay sida uu dareenkiinu yahay marka aad heysataan ilmo naafo ah. Waxaanu nahay waalidiin u fidinaya adeeg waalidiin kale oo ku hadla afka Ingiriisiiga iyo Isbaanishka ee Gobolka Utah oo dhan iyaga oo uu qabanaya adeeg lacag la’aan ah, la talin shaqsi ah oo lacag la'aan ah- waxaanu caawinaa qoysaska iyo caruurtooda leh baahida gaarka ah.
– codso taageerada aad u baahan tahay.